

Hagitaanka COVID-19 ee Loogu Talagalay Warshadaha Yaryar ee Hilibka ee Minnesota

Macluumaadka ku jira dukumintigani wuxuu ku salaysan yahay talooyinka ka soo baxay Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH), Waaxda Beeraha ee Minnesota (MDA), iyo Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortaga Cudurrada (CDC). Xeeladahani waa inay ka mid noqdaan Qorshahaaga U Diyaargarowga COVID-19.

Ka fiiri Waaxda Shaqaalaha iyo Waaxsoosaarka ee Minnesota tusaalaha Qorshaha u Diyaargarowga COVID-19 (See the Minnesota Department of Labor and Industry (DLI) for COVID-19 Preparedness Plan templates): www.dli.mn.gov/updates

Si loo yareeyo halista ka timaada COVID-19 ee goobta shaqada, tixgeliya tillaabooyinka soo socda:

Baaritaanka Shaqaalaha Iyo Dadka Idin Soo Booqda

Baaritaanka shaqaalaha iyo dadka idin soo booqda oo dhamaystiran ayaa wuxuu muhiim u yahay yaraynta idin gaarsiinta iyo sii faafinta COVID-19 Joogteeya hal meel oo laga soo galo xaruntiina oo baaritaan sameeya maalin kasta kahor inta aysan shaqaalaha ama dadka idin soo booqanayaa soo galin xarunta.

- Baadhitaanka bilowga ah: Tani waxay weeyaan hadal ahaan weydiinta su'aalo taxane ah oo haa/maya ah oo ku saabsan astaamaha caanka ah ee COVID-19.
- Shaqsiyaadka kaga jawaaba "Haa" mid ka mid ah su'aalaha baaritaanka ama leh heerkul cabbirkiisu ka sarreeyo 100.0°F, waa in lagula taliyo inay la xiriiraan bixiyahooda daryeelka caafimaadka oo ay baaritaan raadsadaan. Waa inay guryahooda aadaan, sugaan natiijooyinka baaritaanka, oo ay ka fogaadaan dadka kale.
- Loo shaqeeyuhu waa inuu xaqiijiyaa in shaqaaluhu uu iskii isu go'doomi karo (ka dhex bixi karo kuwa kale ee isla guriga ku nool). Hay'adaha Maareynta xaaladaha degdega ah ee maxalliga ah iyo hay'adaha caafimaadka dadweynaha ee maxalliga ah ayaa caawin kara shaqaalaha haddii aysan istakoori karin.
- Tixgeliya inaad siisaan shaqaalaha foomka sii-daynta, rugta caafimaadka, ama meel kasta oo tijaabada lagu qaadayaa in ay si gaar ah loogu ogolaado in warshadu ay hesho natiijooyinka baaritaanka si isla markaaba ee ah shaqaalaha doorta inay saxeeqaan. ((**Authorization for Disclosure of Protected Health Information to Employer**) (U Ogolaanshaha Loo Shaqeeyaha Siideynta Macluumaadka Caafimaadka ee Dhowrsoofoomka ka codso MDA) Tani waxay u ogolaaneysaa maamulka warshadu inay fuliyaan dabagalka goobta shaqada, haddii loo baahdo, in laga saaro dadka uu la xiriiray shaqaalaha laga helay COVID sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah.

Kala fogaanshaha and Xayndaabyada

Fuliya isticmaalka xayndaabyo ku habboon iyo kala fogaanshaha bulshada xaruntiina, oo ay ku jirto isbeddelada howlgalka shaqada, taas oo u ogolaanaysa shaqaalaha inay kala fogaadaan 6 fiit.

- Ku rakiba xayndaab siman, aan daldalool lahayn, tayo waarta leh, oo ah shay si fudud loo nadiifin karo, sida (plexiglass) ama balaastig fidsan oo gal ku habboon ku jira, si aad u siiso kala xiritaan u dhaxeeya shaqaalaha halka aysan kala fogaanshaha jir ahaan 6 fiit ah aan si joogto ah loo samayn karin.
- U sameeeya meel dheeraad ah xilliyada nasashada, qadada, ama sanduuqyada si aad ugu ogolaataan masaafu dheeraad ah oo u dhaxaysa shaqaalaha. Tusaale ahaan, ku diyaariya miisaska la fariisto banaanka.
- U sameeya kooxo shaqaale oo gaar u ah shifti kasta ama hawl kasta si loo xaddido faafitaanka fayraska ee suurtagalka in uu ka soo faafu shakhsi oo uu gaaro hal koox oo yar.
- Ku calaamadeeya 6 fiid laga soo bilaabo miiska wax laga iibsado, saacadaha wakhtiga, iyo aagagga macaamiisha oo dhan si aad u abuurtaan xusuusin muuqaal ah oo ah 6 fiid ah.

Nadaafada shaqsiyeed

Xusuusiya shaqaalaha inay si joogto ah u sameeyaan nadaafadda shaqsiyeed ee wanaagsan marka ay joogaan xaruntiina.

- Joogteeya in aad haysataan kayd idin ku filan oo saabuun iyo tuwaalka gacmaha ee hal mar la isticmaalo; bixiya saldhigyada gacmo-dhaqashada oo dheeraad ah meeshii loo baahdo
- Meel kasta oo gacmaha lagu dhaqdo, ku soo dhajiya tilmaamaha gacmo-dhaqashada oo si dhakhso ah oo fudud loo fahmi karo, oo leh sawirro ama muuqaalo caawinaya. Halkan waxaa ku jira tusaalaha sawir, boostar la soo daabacan karo ah: www.health.state.mn.us/people/handhygiene/wash/dontforget.pdf
- Bixiya gacmo nadiifiye iyo nadiifiyaha lagu tirtiro meelaha kale ee shaqo xarunta oo dhan, gaar ahaan irida laga soo galo, meelaha laga baxo, miiska iibinta, iyo aagaga kala beddelashada.
- Xusuusi shaqaalaha inay iska ilaaliyaan taabashada wajiyagooda, oo ay ku jiraan indhaha, sanko, iyo afka, iyo inay gacmahooda dhaqaan ka hor iyo ka dib marka ay taabtaan qaybahana jirka.
- Ku celceliya anshaxa wanaagsan ee qufaca iyo hindhisada. Halkan waxaa ku jira tusaalaha sawir, boostar la soo daabacan karo ah: www.health.state.mn.us/people/cyc/hcpposter.html

Dhismaha Goobta Shaqada iyo Laydhinta/Hawosiinta

Tixgeliya awooda mugga ee howlgalka, oo kordhiya, hagaajiya, oo dayactira hawo mareenka dhismaha.

- Kordhiya boqolkiiba inta ah hawada dibeda.
- Sistamyada/qalabka dib hawada u soo celiya, ka hagaajiya faltarada hawada dhexe.
- Beddela oo cusboonaysiiya faltarada.
- Ku daara heerka ugu sarreeya ee dhaqaale ahaan habboon ee uu qaboojiyaha banaanka la dhigaa qaadi karo
- Kala tashada khabiir kuleyliyaha, hawo-siinta, iyo hawo qaboojiyaha (heating, ventilation, and air conditioning (HVAC)) si loo wanaajiyo loona hubiyo in hawo habboon la joogtaynayo.

Qalabka Isilaalinta Shaqsiyeed (PPE) iyo Daboolida Wajiga

COVID-19 dadka ayaa qof-qof isugu gudbiya isaga oo dhibco yaryar ah marka ay dadku qufacaan ama ay hindhisaan. Tusaalooyinka daboolka wajiga ee habboon iyo borotokoolka Isilaalinta Shaqsiyeed (PPE) waxaa ka mid ah:

- Ka dalbo in dhammaan shaqaala iyo dadka idin soo booqanayaa ay si joogto ah u xirtaan maaskarada wajiga lagu daboolo oo cudbi ah, wax wejiga lagu daboolo ama maaskarada halmar la adeegsan karo oo ay weheliso qalabka isilaalinta shaqsiyeed ee caadiga ah sida galoofyo cinjir ah ama maqaar ah, ee loo baahan yahay in la qabto howlaha caadiga ah ee shaqada.

- Siiya Qalabka Isilaalinta Shaqsiyeed (PPE) ee loo baahan yahay iyo daboolka wajiga, oo ay weheliso tababar ku saabsan adeegsiga saxda ah, oo shaqaalaha la siinayo oo aan wax kharash ah ugu fadhiyin.
- Xusuusiya shaqaalaha inay maydhaan gacmahooda kadib marka ay xirtaan, taabtaan, ama iska saaraan waji daboolka
- Tixraaca tilmaamaha Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka Maraykanka (U.S. Food and Drug Administration (FDA)) “Isticmaalka Neefsiiyaha, Maaskarada, iyo Waji Daboolka Marada ah ee Gudaha Waaxda Cuntada iyo Beeraha Wakhtiga Lagu Jiro Aafada Cudurka Coronavirus (COVID-19)”: www.fda.gov/food/food-safety-during-emergencies/use-respirators-facemasks-and-cloth-face-coverings-food-and-agriculture-sector-during-coronavirus.

Wada Xiriirka

Shaqaalaha siiya tababar ku saabsan Qorshaha u Diyaargarowga COVID-29 ee xaruntiina iyo tallaabooyinka aad qaadaysaan si aad u dhintaan khataraha.

- Sameeya nidaam loogu talagalay shaqaalaha inay maamulka xarunta ugu soo sheegaan calaamadaha COVID-19 ee ay isku arkaan ama ay ku arkaan xubnaha qoyska.
- Ugu sheega si cad in shaqaaluhu aysan la kulmi doonin cawaaqib xun haddii ay guriga joogaan markay jirran yihiin.
- Ku bixiya macluumaadka luqadaha ay fahmaan shaqaaluhu isla markaana si muuqata u soo dhaji tilmaamaha iyo xusuusinta ku saabsan astaamaha cudurka, gacmo dhaqashada iyo anshaxa nadaafada iyo habraacyada soo sheegitaanka haddii ay xanuunsan yihiin. Halkan guji si aad u hesho fariimaha coronavirus oo loo tarjumay luqado badan: www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/materials/keymessages.html

Nadiifinta iyo jeermis ka dilista

Fuliya nadiifinta, fayodhowrka iyo jeermis ka dilista aagagga ay dadku wadaagaan ee xarunta oo dhan. Abuura liis hubinta si loo hubiyo in la joojteeyo.

- Si buuxda ugu nadiifiya oo isticmaala fayodhowrka iyo/ama waxyaabaha jeermiska ka dila meelaha qalbka shaqada iyo meelaha la wadaago sida goobaha nasashada, qolka qadada, iyo musqulaha ugu yaraan maalin kasta, waxaa la doorbidaa marka shifi kastaa isbeddelaan. Fiiri gaar ah u yeesha meelaha ay taabashadu ku badantahay sida gacma qabsiga jaranjarada, qalabka, ammaanka, gacanta albaabka, gacanka makrawayfka, kombuyuutarada, ama meelaha shidista nalka, iyo sidoo kale wixii xayndaab ah ee lagu rakibay si loo meelmariyo kala fogaanshaha bulshada.
- U adeegsada jeermis dile ay diiwangelisay Wakaalada Ilaalinta Deegaanka (Environmental Protection Agency(EPA)) si aad jeermiska uga dishaan meelaha dushooda (sagxadaha). Liiska alaabtan/badeecadan ayaa waxaa laga heli karaa: www.epa.gov/pesticide-registration/list-n-disinfectants-use-against-sars-cov-2
- Hubiya inaad fiirisaan tilmaamaha leebalka/calaamada ee shayga si aad u heshaan in la ogolyahay iyo halka ay jeermis-dilahani yahay ammaan iyo/ama in fayodhowrahani ammaan u yahay oo lagu taliyey in loo isticmaalo xarumaha cuntada.
- Hubiya in shaqaaluhu ay raacayaan tilmaamaha calaamadaynta/leebalka oo ay raacayaan wakhtida muddada isticmaalka si ay si waxtar leh wax u nadiifiso oo jeermis uga disho.
- Haddii shaqaale uu ku bukoodo shaqada, goobtooda shaqada iyo meelaha la wadaago waa in la nadiifiyo oo jeermiska laga dilo isla markiiba ka hor inta aan qof kale loo qoondaynin goobta shaqada ee shaqaalaha jirran.
- Ka tixraaca tilmaamaha CDC ay soo saartay “Nadiifinta iyo Jeermis Ka dilista Xaruntaada” wixii macluumaad dheeri ah (Refer to the CDC issued guidance “Cleaning and Disinfecting Your Facility” for more information): www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/prepare/disinfecting-building-facility.html

Dadka Soo booqanaya, Dhismaha iyo Goobaha Dhismaha ee la Isla Wadaago

- Ku xaddida dadka idin soo booqanaya keli ah kuwa muhiimka u ah howlaha ganacsiga isla markaana xaddida meelaha ay dadka idin soo booqdaa ay aadi karaan xarunta dhexdeeda.
- Ka dalbada dadka aan shaqaalaha ahayn ee soo galaya xarunta, sida shaqaalaha nadiifinta, qandaraasleyaasha kontoroolka cayayaanka, iyo darawalada keenitaanka ama qaybinta in ay raacaan shuruudahiina COVID-19.
- Aqoonsada howlaha kale ama kireysteyaasha kale ee idinla wadaagaya dhismaha ama goobta, xitaa haddii ay tahay mar mar ama xilli xilli, sida goobta kaydka ee la wadaago, dekadaa raritaanka, kiraysashada goobta waxsoosaarka, iwm. Tababbarkiina Qorshaha U Diyaargarowga COVID-19 waa in ay ku jirto aagagan iyo dadkan hadba sida ku habboon

Fulinta Alaab u geynta, Alaab qaadashada iyo keenista

- Ku aqbala alaabada la keenayo iyada oo la adeegsanayo hab aan la isa soo gaaraynin markii ay suurtagal tahay.
- Joogeeya in la isu jirsato masaafo 6-fiit ah markii aad aqbalaysaan ama aad isweydaarsanaysaan alaabooyinka.
- Yareeya ama joojiya isweydaarsiga iskaanarka la wadaago, qalimaanta, ama qalabka kale ee alaab keenitaanka.

Yaraynta Cudur Isugudbinta Macaamiisha iyo Dadka loo Adeegayo.

- Yareeya tirada dadka la socda macaamiisha.
- Soo dhejiya calaamad sheegaysa in haddii macaamiishu aysan dareemaynin in ay caafimaad qabaan ama ay isku arkaan calaamadaha COVID-19, ay tahay inay guriga joogaan. Waa inay sidoo kale joogaan guriga haddii ay jiraan xubin reerka ka tirsan oo lagu arkay astaamaha cudurka.
- Macaamiishu ha buuxiyaan liiska hubinta baaritaanka sida midka loo isticmaalo shaqaalaha.
- Ku dhiirrigeliya macaamiisha inay gacmahooda jeermiska ka dilaan (sanitize).
- Macaamiisha weydiista inay xirtaan wax wejiga lagu daboolo. Daboolka wejiga ee marada ahi MA AHA wax beddelaya in jir ahaan la kala fogaado 6 fiit.
- Tirtira qalabka la isticmaalay macmiil kasta ka dib.

Qawaaniinta Qaadashada iyo Isu Gudbinta Lacagta

- Ku calaamadeeya xariijin 6-fiid ah wajahada hore ee miiska wax iibinta iyo calaamadin 6-fiit ah macaamiisha dheeraadka ah ee safka ugu jira kuwa lacagta ku bixinaya ganacsiga.
- Ku rakiba xayndaab miiska lacag bixinta.
- Adeegsada habka lacag bixinta ee aan la isa soo gaaraynin marka ay suurtagal tahay sida eleckaroonig ahaan u soo wareejinta lacagta ama ku bixinta kaarka bangiga oo u ogolaanaya macmiilku inuu bilaabo oo uu dhammaystiro lacag bixinta meel durugsan ama iyada oo uu ka durugsanyahay shaqaalaha.

Yaraynta iyo Maareynta Muga Goobta

- Yareeya awoodda mugga in ay ahaato boqolkiiba inta la ogolyahay si loo ilaaliyo kala fogaanshaha bulshada (hadda 50% awooda muga).
- Ku xayeysiya/soo bandhig borotokoolka ganacsigiina si macaamiishu ay diyaar ugu ahaadaan oo ula socdaan isbeddelada. Adeegsada websaytyada, warbaahinta bulshada, taleefan ku wicitaanka ballanta ka hor, iwm.
- Calaamado ku Ssoo dhejiya albaabka xarunta faahfaahinaya borotokoolka/qawaaniinta iyo nidaamkiina.
- Adeega u diida oo macaamiisha kula taliya inay ka baxaan xarunta haddii ay muujinayaan astaamaha COVID-19.

Ka Jawaabida Natiijada oo COVID-19 Laga Helay

Waaxda Caafimaadka ee Minnesota waxay ku talinaysaa in baaritaan joogtada ah lagu sameeyo shaqaalaha aan isku arag calaamadaha cudurka (xitaa kuwa leh astaamaha cudurka oo aad u fudud), kuwa lagu aqoonsaday baaritaan xoog leh oo lagu sameeyey shaqaalaha bilowga shifti kasta ee shaqada. Laakiin, waxaa jiri kara xaalado marka la baarayo dhammaan shaqaalaha (kuwa calaamadaha cudurka isku arkay iyo kuwa aan isku arkinba) ay tahay in la tixgeliyo. Qodob muhiim u ah qaadashada go'aankan ayaa ah kor u kac aad u sarreeya oo kiisasaka cudurka laga helay ah muddo gaaban gudaheed, oo tiro ahaan ku habboon tirada shaqaalaha.

Maxaad filan kartaa haddii shaqaale laga helo COVID-19?

- MDH ayaa waxay wici doontaa shaqaalaha jirran si ay uga waraysato taariikhda jirrada iyo xiriirada guriga iyo goobta shaqada.
- Waxay noqon kartaa dhowr maalmood kahor inta wakiil ka socda MDH awoodayo in uu waco oo waraysto shaqaalaha jirran. Sidaas darteed, waxaanu kugula talinaynaa ku dhiirrigelinta shaqaalahaaga inay saxeexaan foomka “Authorization for Disclosure of Protected Health Information to Employer” (“U Ogolaanshaha Loo Shaqeyaha Siideynta Macluumaadka Caafimaadka ee Dhowrsoo”). Helitaanka natiijooyinka oo isla markiiba ah ayaa waxay idin siin kartaa fursad aad ku samaysaan raadinta xiriirka si aad u go'aamisaan shaqaalaha kale ee laga yaabo in uu soo gaaray.
- U diyaariya koox, ay kujiraan wakiillo ka socda warshada, MDA, caafimaadka dadweynaha maxalliga ah, iyo rugta caafimaad ee deegaanka, si ay dib ugu eegaan habka waxqabadka ugu wanaagsan isla markaana ay u abuuraan qorshaha baarintaanka shaqaalaha isku arka calaamadaha cudurka.

Goorma ayuu shaqaale laga helay COVID shaqada ku soo noqon karaa?

- Shaqaale kasta oo laga helo cudurka, iyo sidoo kale shaqaalaha jirran ee aan baaritaan cudur lagaga helin, waa inay joogaan guriga, oo, haddii ay suurtagal tahay, ay yeeshaan qol iyo musqul u gaar ah si loo yareeyo khatarta in uu ku faafo xubnaha kale ee qoyska. Waxay u baahan yihiin inay keli ku ahaadaan guriga ilaa calaamaduhu ay ka tagaan oo saddexdan shuruudoodna la buuxiyey:
 - » Calaamaduhu way soo fiicnaadeen (tani waxay qaadan kartaa ilaa 14 maalmood) OO,
 - » Ugu yaraan 10 maalmood ayaa ka soo wareegtay tan iyo markii ugu horreysay ee astaamaha lagu arkay OO,
 - » Ugu yaraan saddex maalmood ayaa kasoo wareegtay tan iyo markii xumaddu ay tagtay (iyada oo aan la isticmaalin daawooyinka yareeya qandhada).

Ka waran goobta shaqada iyo qoyska xiriirka la leh shaqaalaha COVID laga helay?

- Xarumaha ka shaqeeya hilibka ayaa loo tixgelinayaa inay yihiin kaabayaal muhiim ah waxayna waydiisan karaan dadka xiriirka la yeeshay qof uu soo gaaray cudurku in ay sii wadaan shaqada hadii aysan awoodaynin inay shaqadu socoto shaqaalahaas la'aantood. Si kastaba ha noqotee, MDH waxay ku talinaysaa dadka xiriirka la yeeshay qof uu soo gaaray cudurku ee warshadaha kaabayaasha muhiimka ahi in ay isku karantiilaan guriga 10 maalmood markii ay suurtagal tahay.
- **Xubnaha qoyska ee xiriirka la yeeshay waa inay joogaan guriga oo iskarantiilaan 14 maalmood.**

Sidee ayaad u caawin kartaa shaqaalahaaga?

- Siiya caawimaad shaqaalaha inta ay xanuunsanayaan oo ay kasoo bogsanayaan.
- Haddii shaqaale laga helo COVID-19 oo uusan haysanin waxyaabaha daruuriga ah, ee muhiimka ah oo ka horjoogsanaya in uu iskii isugu karantiilo guriga, la xiriira caafimaadka dadweynaha ee deegaanka. (www.health.state.mn.us/communities/practice/connect/findlph.html)
- Haddii shaqaaluhu khatar weyn ugu jiro inuu qaado xanuun halis ah (tusaale, da'diisa oo 65 sano ah ama ka weyn ama uu qabo xaalad jirta sida cudurka sambabada oo joogto ah, cudurka wadnaha oo joogto ah, sonkorow, kansar, ama sistamka difaaca jirka oo daciifay), la tashada daryeel bixiye caafimaad.

- Haddii calaamadaha cudurka ee shaqaaluhu ay ka sii darayaan, ka caawiya inay raadsadaan daryeel caafimaad idinka oo siinaya khayraadka sida helitaan taleefanka, gaadiidka, ama khayraadka kale ee lagama maarmaanka u ah helitaanka daryeelka loo baahan yahay.
- Haddii shaqaaluhu dareemayaan neefsashada oo ku adag, xanuun jooqto ah ama cadaadis laabta ah, ama calaamadaha kale ee deg-dega ah, wac 911.

Macluumaad Dheeraad ah iyo Khayraad

La socda wararka ugu dambeeyey ee loogu talagalay ganacsiga iyo shaqaalaha isla markaana cusboonaysiiya Qorshaha U Diyaargarowga COVID-19., hadba sidii loogu baahdo.

- Taxaddara MN (Stay Safe MN): <https://staysafe.mn.gov/>
- Waaxda Beeraha Minnesota (Minnesota Department of Agriculture): www.mda.state.mn.us/covid-19-agriculture
- Khadka Su'aalaha MDA COVID-19 (MDA COVID-19 Question Line): mdaresponds@state.mn.us
- Khadka Dhexe ee Baadhitaanka Caanaha iyo Hilibka (Dairy and Meat Inspection Main Line: 651-201-6300 or email MDA.MeatPoultryEgg@state.mn.us): 651-201-6300 ama eimail MDA.MeatPoultryEgg@state.mn.us
- Minnesota.gov Jawaab-celinta COVID-19 ee gobolka oo dhan (Minnesota.gov statewide COVID-19 Response): <https://mn.gov/covid19>
- Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (Minnesota Department of Health): www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/index.html
- Si aad u hesho link-yada hagitaan dheeraad ah, fadlan booqo (For links to additional guidance, please visit): www.health.state.mn.us/people/foodsafety/emergency/covid.html
- Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota (DEED) (Minnesota Department of Employment and Economic Development): <https://mn.gov/deed/newscenter/covid/>
- Waaxda Shaqaalaha iyo Waaxsoosaarka ee Minnesota (Minnesota Department of Labor and Industry): www.dli.mn.gov/updates
- Tilmaamaha kumeelgaarka ah ee CDC ee Loogu Talagalay Ganacsiyada iyo Loo shaqeeyayaasha Ka Jawaab-Celinaya Cudurka Coronavirus 2019 (COVID-19): 19) (CDC's Interim Guidance for Businesses and Employers Responding to Coronavirus Disease 2019 (COVID-19)): www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/community/guidance-business-response.html
- Talooyin dheeraad ah waxaa laga heli karaa: Ganacsiga Guud Su'aalaha Markasta la Isweydiiyo (Additional suggestions can be found at: General Business Frequently Asked Questions) www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/community/general-business-faq.html
- Nadiifinta iyo Jeermis Ka dilista Xaruntaada ee CDC (CDC's guidance on Cleaning and Disinfecting Your Facility): www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/community/disinfecting-building-facility.html
- Badbaadada Cuntada ee FDA iyo Cudurka Coronavirus 2019 (COVID-19) (FDA's Food Safety and the Coronavirus Disease 2019 (COVID-19)): www.fda.gov/food/food-safety-during-emergencies/food-safety-and-coronavirus-disease-2019-covid-19
- Isticmaalka Neefsiyaha, Maaskarada, iyo Waji Daboolka Marada ah ee Gudaha Waaxda Cuntada iyo Beeraha Wakhtiga Lagu Jiro Aafada Cudurka Coronavirus (COVID-19) ee FDA (FDA's Use of Respirators, Facemasks, and Cloth Face Coverings in the Food and Agriculture Sector During Coronavirus Disease (COVID-19) Pandemic): www.fda.gov/food/food-safety-during-emergencies/use-respirators-facemasks-and-cloth-face-coverings-food-and-agriculture-sector-during-coronavirus